

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

	Arrinta	Soo-gudbinta oo kooban	Qaybta la soo jeediyay
1	Muhiimadda baaritaanka.	<p>Dhammaan soo-gudbinada la helay ayaa loo tixgeliyey in baaritaan dadweyne la qabto. Qodobbada xooga la saaray waxaa ka mid ahaa: weerarradu waxay ahaayeen kuwo aan horay uga dhicin New Zealand, ma jirin maxkamadaynta dambiilada, qoysasku ma awoodin inay si buuxda uga qaybqaataan geeddi-socodka RCOI, RCOI waxay wax ka qabatay oo keliya falalka hay'adaha dawladda, inta badan caddaynta RCOI waa la ciribtiray, la nadiifiyey ama laga saaray, iyo in tani ay tahay dacwadda sharciga dadweynaha ee ugu dambaysay. Soo-gudbitaano kala duwan waxay xooga saareyn in aanay tixgalinayn in RCOI ay si ku qanac ah u dabooshay dhammaan arrimaha ama ay ku hawlan tahay heer ku filan si ay u helaan jawaabo gaar ah iyo xisaabtanka la filayo, in warbixinta RCOI lafteeda ay adagtahay in lala shaqeeyo dhibanayaasha (sababa ah luqadda, la'aanta taageero xirfadeed iyo arrimaha kale ee la heli karo) iyo inay tixgeliyeen talooyinka dheeraadka ah ee lagama maarmaanka u ah ka hortagga weerarrada mustaqbalka. Waxa kale oo jiray mawduuc joogto ah in arrimaha dhibanayaasha iyo qoysaskoodu ay la kulmeen habab sharci oo hore ay ka dhigeen kuwo aan la maqal, iyo kuwo aan awood lasiin, iyo in hannaan dib u soo celin ah oo diiradda saaran hadda loo baahan yahay.</p>	N/A

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

2	Sidee loo xagjireeyay argagixiyaha sideese tan looga hortagi karaa mustaqbalka?	<p>Soojeediyeen tiro xisbiyo/dhinacyo ah. Su'aalaha gaarka ah ee la weydiiyay waxaa ka mid ahaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Goorma iyo sidee bay aragtidiisa cunsuriyadda ahi u kobceen yaraantiisii? • Waa maxay sababta aragtidiisa cunsuriyadda ah loo joojin waayay waqto hore? • Waa maxay sababta dhaqdhaqaaqiisa onlaynka ah iyo qalabkiisu ay u noqdeen kuwo aan la baadhin? • Maxaa saameeyay isaga oo jidkan ku jira isaga oo kuray ah iyo qof weyn? • Waa maxay waxqabadyada uu ku hawlanaa ee u suurtageliyay xagjiraynta ilaa heerkaas? • Talooyin nooc ee ah ayaa la samayn karaa si looga hortago dhimashooyinka mustaqbalka inay ku dhacaan xaalado la mid ah? • Ma jiraan fursado la lumiyay oo lagu faragelin lahaa? • Sidee loo joojin karaa dariiqa xagjiraynta iyo nacaybka hadda ka dib? • Waa maxay xeer-dejinta, sharci-dejinta ama kuwa kale ee la qaadi karo ee la xiriira gelitaanka iyo xakamaynta websaydyada iyo ciyaaraha intarneetka ee huriya waxa kabaxsan bini'aadantinimada iyo rabshadaha? <p>Walaaca la soo jeediyay waxaa ka mid ahaa in RCOI-da aysan si waafi ah wax uga qaban argagixiyaha adeegsigiisa internetka iyo baraha bulshada iyo in hay'adaha Dawladdu ay ogaan kareen weerarka iyaga oo si habboon isugu koobaya ilaha xag-jirnimada internetka.</p>	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
---	---	--	---

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

3	Maxaa laga og yahay taariikhda safarka argagixiska oo ma jiraan wax caddaynaya inuu tababar kusoo qaatay dibadda?	Arrintan waxaa soojeediyeen tiro xisbiyo ah. Su'aalaha gaarka ah ee la weydiiyay waxaa ka mid ah sababta taariikhda socdaalku aysan kor ugu qaadin calamadaha cas markii uu galay NZ iyo in laga yaabo inuu tababar kusoo qaatay oo uu kusoo dilay dibadda (iyadoo lagu saleynayo tilmaanta walaasha ee ah inuu u safray Afgaanistaan). Tiro soo-jeedino ah ayaa tixraacaya, iyadoo laga walaacsan yahay, waayo-aragnimada muuqata ee argagixiyaha ama kartida hubka iyo xeeladaha militariga inta lagu jiro weerarka.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
4	Calaamadaha gaduudan miyay seegeen sirtoonka/Booliska?	Arrimaha gaarka ah ee la soo jeediyay waxaa ka mid ah: ku guuldareysiga adeegyada sirtoonka si ay ula socdaan "Barry Harry Tarry" ama ay dabagalaan - IP122.61.118.145 iyo sidoo kale arrimaha hoos ee la xiriira hubka.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI)
5	Miyuu nidaamka shatiga hubka ciladeysan gacan ka geysatay dhimashooyinka?	Waxaa soo jeediyaya dhinacyo kala duwan oo aan ku raacsanayn RCOI ogaanshaha in aysan go'aamin karin in arrimaha habka hubku ay yihiin kuwa sababa weerarka.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
6	Waa maxay sababta aan loo soo sheegin war kusaabsan hubka iyo iibsashada rasaasta?	Qoysasku waxay walaac ka muujiyeen warbixin la'aanta ku saabsan iibsashada rasaasta iyo awoodda Booliisku inay raadiyaan oo ay khariidadeeyeen iibsiyada muhiimka ah, tusaale ahaan, rasaasta awoodda sare leh.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
7	Xeerka xubinnimada kooxda qoryaha.	Qoysaska qaar ayaa sheegay in xubnaha ku sugan Otago Shooting Sports Rifle iyo Pistol Club iyo Bruce Rifle club ay walaac ka muujiyeen argagixiyaha oo ay su'aaleen hadii ay jiri doonto warbixin qasab ah.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

8	Muxuu isbitaalku u sheegi waayay dhaawaca hubka kasoo gaaray ee argagixiyuhu soo bandhigtay bishii Luulyo 2018?	Sida kor ku xusan.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
9	Miyay tahay in milkiilayaasha hantidu lahaadan shuruudo warbixineed oo khasab ah?	Qoysaska qaar ayaa ka walaacsan in mulkiilaha gurigga uu kunoolaa argagixiyuhu uu ku guul daraystay inuu soo sheego khasaaraha hantidii uu kiraystay argagixiyuhu, taasoo ka dhalatay soo bixitaanka hubka si shil ah.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
10	Waa maxay sababta wareysiga argagixiyaha ee RCOI loo hakiyay 30 sano?	Soo-gudbino kala duwani waxay tilmaamayaan in aanay ku faraxsanayn awood la'aanta qoysaska si ay u helaan macluumaadka la xakameeyey iyo in la ogaado haddii Dhimasho-baadhu arkay.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).
11	Argagixiyahu ma ka helay kaalmo toos ah qof kale oo joogay 15 kii Maarso 2019?	Dhinacyada qaar ayaa sheegay in uu meesha joogay qof kale oo wax toogtay ama caawiye ahaa. Walaac ayaa laga muujiyay in muuqaalka GoPro uu muujinayo qof ag maraya gaariga argagixiyaha oo gacanta ku sita ookiyaalaha indhaha waxeyna eheed isla markaa kadib markuu dhaqaaqay argagixiyuhu. Waxa kale oo jira sheegashooyin kale oo ah in markhaatiyo kale ay rumaysan yihiin in uu jiray ugu yaraan hal qof oo kale oo joogay banaanka Masjidka An-Nuur kaasoo xidhnaa maro madaw iyada oo aan wax sharraxaad ah laga helin. Waxaa jira markhaati aaminsan in qofkani (oo aan ahayn argagixiyaha) uu ka tooganayay dhinaca midig ee Masjidka An-Nuur. Waxaa jiraan sheegashooyin ah in qaar ka mid ah markhaatiyaasha Masjidka An-Nuur ay sheegeen in ay maqleen argagixiyaha oo qof la hadlaya oo codsanaya digniin haddii ay Booliisku yimaadaan. Soo-gudbinada kale ayaa su'aalayo haddii ay jiraan wax falanqeyn ah oo ku saabsan codka laga duubay gudaha baabuurka argagixiyaha markii uu u socday Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood si loo ogaado cidda, haddii uu jiro qof, uu la yeeshay wadahadal laba geesood ah?	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

12	Booliska ayaa lagu eedeeyay in ay soo wariyen in ilaa 9 qof ay ku lug lahaayeen markii hore.	Soo-gudbino qaar ayaa waydiinayo in tani ay muujinayso toogasho yaal badan.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.
13	Ma laga qaaday faraha ama DNA-ga dhammaan hubka yaalay goobta?	Soo gudbino qaar ayaa u arka in tani ay aqoonsan karto la-hawlgalayaasha.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
14	Miyuua argagixiyuhu lahaa meel uu ku dhuunto oo heegan u ahaa weerarka ka dib?	Soo gudbino qaar ayaa u arka in tani ay noqon karto dariiq lagu aqoonsado la-hawlgalayaasha.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
15	Argagixiyuhu miyuu taageero dadban ka haysatay la-hawlgalayaal dhinaca internetka?	Ilaha caddaynta ee muhiimka ah waa kaydka maskaxda kombiyuutarka argagixiyaha - halka uu yaalo waa in la baaro. Soo-gudbin kale ayaa kor u qaaday suurtagalnimada "xaqijinta eexda" taas oo ka dhalatay isaga oo lagu tilmaamay inuu ahaa keligii jilaa marxaladihii hore wuxuuna xusay in qoraalkiisa uu ka kooban yahay luqadda loo isticmaalo websaydyada garabka midig ee xagjirka ah iyo kaftanada qaaseysan oo kala duwan. Ma la baadhay log-ka routerkiisa ee ku saabsan baadhitaankiisa iyo daalacashadiisa? Dhammaan macluumaadka dadka uu la xidhiidhay ma la daba galay?	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

16	Saaxiibka ciyaartu ma ka caawiyay wax ka beddelka qoriga?	Qoysasku kama warqabaan in tan la baaray.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
17	Su'aasha halka argagixiyahu ka helay steroids-ka markii uu isku diyaarinayay weerarka.	Soo gudbino qaar ayaa u arka in tani ay noqon karto dariiq lagu aqoonsado la-hawlgalayaasha.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
18	Su'aasha halka uu argagixiyahu ku hoyday habeenka dhexdiisa jidka uu uga soo laabtay Christchurch kuna socday Dunedin, ka dib kormeerkiisii ugu dambeeyay ee Masjid an-Nuur.	Soo gudbino qaar ayaa su'aala in saaxiib uu hoy siiyay argagixiyaha iyo in laga yaabo inay ku lug lahaayeen weerarka.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
19	Maxaa laga og yahay dhaqdhaqaaqa qof kasta oo ka mid ah Shahiidada iyo in laga yaabay in qof dhintay lagu badbaadin karay daaweyn degdeg ah?	Waxaa jeediyay tiro dhinacyo ah oo ay weheliso codsiyada ra'yi khabiir oo ku saabsan sababta dhimashada. Walaac in macluumaadka hadda jira uu yahay mid guud ama aan si filnayn loo fahfaahinin. Soo-gudbinada ayaa sidoo kale soojeediyay in loo baahan yahay in la fahmo marxaladaha ka hor, inta lagu jiray iyo ka dib weerarka shahiid kasta iyo qof kasta oo ay saameeyeen, oo ay ku jiraan (a) safarkooda Masjidka, (b) dhaqdhaqaaqooda Masjidka, (c) Cidda ay la socdeen, (d) dhaq-dhaqaaqooda gudaha/ agagaarka Masjidka, (e) sababta degdegga ah ee dhimashada, iyo (f) goorta iyo goobta uu qof walba ku dhintay (ilaa inta ay suurtoagal tahay in la ogaado).	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

20	Miyay gurmada/Jawaab-bixiyeyaasha ugu horreeyay si ku filan ugu qalabaysnaayeen tababar iyo agab labaduba?	<p>Soojeediyeen tiro xisbiyo ah. Walaacyo ayaa lasoo jeediyay oo ahaa in aysan jirin baaritaan dadweyne oo ku saabsan sida dhammaan jawaabayaasha ugu horreeya ee ay khuseyso, kuwaas oo ah booliiska, adeegga ambalaasta, iyo Isbitaalka Christchurch, ay uga jawaabeen 15-kii Maarso 2019. Qoysasku waxey fahmayaan dabeecadda aan caadiga ahayn ee waxa dhacay wayna u mahadcelinayaan dadaalka dhabta ah ee ay sameeyeen jawaab-bixiyeyaashii ugu horreeyay. Si kastaba ha ahaatee, waxay ka walaacsan yihiin gurmada-bixiyeyaasha ugu horreeya oo aan la qalabayn, haddii ay tahay bixinta 'qalabka' ama tababarka (oo ay ku jiraan tababarka jawaab-bixiyeyaasha kale), si ay ula tacaalaan wixii dhacay. Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Miyeeey ahaayeen xubno ka tirsan Booliiska, Kooxda Dembiilayaasha Hubaysan (AOS) iyo Kooxda Xeeladaha Gaarka ah (STG) kuwaas oo "u janjeeray dhaawacyada, kala soocay dadkaas oona usoo saaray daryeel dheeraad ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ahaa," dhammaan la tababaray sida lagu qeexay dulmar caddaynta? • Xubnaha AOS-ka iyo STG-ka miyay ahaayeen kuwa "u janjeeray dhaawacyada, kala soocay dadkaas oona usoo saaray daryeel dheeraad ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ahaa", mid ka mid ah dhakhaatiirta AOS ama dhakhaatiirta STG sida lagu qeexay dulmarka caddaynta? • Miyeeey xubnaha STG kuwaas "oo u janjeeray dhaawacyada, kala saarayey dadkaas oona usoo saarayay daryeel dheeraad ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ahaa" haystaan shahaadada sanadlaha ah ee hadda jirta; qaatay tababarka sanadlaha ah oo dib u soo kicinta ah; oo ay dhammeeyeen 40 saacadood oo ah tababar raacida-dheer ah oo ay la qaateen dhakhaatiirta caafimaad degdegga ee shahaadada haysto ee ambalaasta St John? • Waa maxay sababta dhakhaatiirta AOS aan loogu tababarin heer la mid ah kuwa dhakhaatiirta STG? Miyay tahay in sidaas loo tababaro? • Miyay tahay in saacadaha 40 ee tababarka raacitaanka-dheer ee STG ee ay wataan dhakhaatiirta ambalaasta St John ay qasab noqon lahayd halkii ay "isku dayi lahaayeen"? 	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
----	--	--	--

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

21	Maxay Booliisku u iman waayeen si degdeg ah?	Soo gudbinada waxay kor u qaadayaan arrinta muujinta argaggixiyaha oo loo diray madaxda 1:32pm.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
22	Sidee buu argagixiyuhu uga baxay, oo hubkiisii dib usoo buuxsaday oo uuna dib usoo galay Masjid Nuur, iyadoo aanay Boolisku soo dhexgelin?	Qoysaska qaar ayaa ka walaacsan in argagixiyuhu uu bilaabay weerarkiisa oo uu waqti u helay inuu dibadda u baxo, dib u soo buuxiyo hubkiisa oo uu dib usoo galo Masjidka An-Nuur. Waxay sidoo kale walaac ka muujinayaan sida argagixiyuhu ugu kalsoonaa waqtiyeynta iyo jawaab-celinta Booliiska oo aan ka labalabeyn inuu baxo, dib u soo buuxiyo oo uuna dib usoo laabto si uu u toogto dad badan.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
23	Maxaa sababay dib u dhaca jawaabta caafimaadka?	Soo gudbinada kala duwan ayaa kor u qaadaya daahitaanka ambalaasyada imanaya goobta iyo bixinta daawaynta.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
24	Maxay tahay sababta gurmud-bixiyayaasha ugu horrayay ay dadka rayidka ah uga hor istaageen in ay dib u soo galaan Masjidka si ay ufidayaan caawimo?	Soo jeediyay dhinacyo kala duwan. Waxaa jira walaac laga qabo dib u dhaca ku yimid gelitaanka Masjidka An-Nuur markii ay Boolisku u sheegeen dadkii badbaaday/markhaati in argagixiyuhu ka baxday. Dadka ayaa isku dayay in ay dib ugu soo laabtaan Masjidka si ay u badbaadiyaan noloshada dadka la toogtay balse waxaa u diiday Booliska in ay gudaha u galaan.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

25	Booliisku miyay ka hor istaageen adeegga ambalaasta inay soo galaan Masjid an-Nuur haddii ay sidaas tahayna maxaa sababay?	Qoysaska qaar ayaa sidoo kale ka walaacsan in Booliisku ay 'ka celiyeen' shaqaalaha ambalaasta (iyo kuwa kale) inay galaan Masjidka An-Nuur si ay u bixiyaan gargaar degdeg ah. Qaar ayaa waydiiyey inay jiraan caqabado hortaagan jawaab-bixiyeyaashii ugu horreeyay ee ay booliisku soo rogeen kuwaas oo laga yaabo inay saameyn xun ku yeeshen natiijooyinka badbaadada dhibbanayaasha qaarkood.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
----	--	---	--

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

26	Yaa kala saaray dadka dhaawacmay iyo kuwa dhintay sideese loo sameeyay arrintan?	<p>Arrin ay soo jeediyeen qoysas tiro badan. Su'aalaha arrintan ku saabsan waxaa ka mid ahaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Sidee bay gurmada-bixiyeyaashu ugu horeeyay u go'aamiyeen in qofku aanu noolayn xaalad kasta? • Yaa go'aamiyay in qof nool yahay iyo in isbitaal loo qaado? • Maxey ahaayeen tillaabooyinka la qaaday si loo hubiyo in kuwii Shahiidada ahaa ee markii dambe la go'aamiyay in ay ku dhinteen goobta, in aysan dhab ahaantii weli noolayn oo ay suurtagal ahaan laheed in lagu maareeyo gargaar degdeg ah? • Ma laga yaabaa in dhibanayaasha nool lagu qalday inay dhinteen oo aysan helin daweyn arrintan awgeed? • Miyaa go'aan laga gaaray kuwa nool oona noolaan kara iyo kuwa leh xubin shaqeyneysa iyo dhaqdhaqaaq laakiin aan sii noolaan karin? Hadday sidaas tahay sidee? • Miyay jireeyn dhibbanayaal muujinaya calaamado noolansho ah laakiin looga tagay goobta sababtoo ah jawaab-bixiyeyaasha ugu horreeyay ayaa qiimeeyay in aan la badbaadin karin? • Immisa saacadood ayaa la hubiyay mid kasta oo ka mid ah dadka dhintay, yaase hubiyay? • Miyey jiraan wax diiwaan ah oo ku saabsan qiimaynaha kala soocida? Haddi la waayo miyay ahayd in la xafido diiwaanadaas? • Nidaam nooc kasta miyaa jiray oo lagu soo qaadayo laguna soo ururinayo dhibanayaasha ama habab kale oo shaqo wadaag ah oo dhibbanayaasha looga soo saari lahaa Masjidka si loo daweyo? • Miyay dhakhaatiirta xarunta caafimaadka ee maxaligu ku lug lahaayeen kala soocida ka dhacaysay Xarunta Islaamka ee Lindwood? • Maxay ahayd jawaabta hawlgelinta ee booliiska iyo adeegyada caafimaadka iyo mid kasta oo ka mid ah bixiyayaasha adeegga gargaarka degdegga ah? 	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
----	--	--	--

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

27	Miyeey jiraan wax caddaynaya gargaar la siiyay dad rasaastii ku dhaawacmay isla goobta oo badbaaday?		Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
28	Dhibaatooyinka raadiyaha sinaba ma uga qayb qaateen khasaaraha nafeedka?	Qoysas kala duwani waxay rabaan inay ogaadaan haddii dhibaatooyinka nidaamka raadiyaha iyo tignoolajiyada raadraaca waqtiga dhabta ah lagu aqoonsaday war-murtiyeedka rasmiga ah ee booliisku, si kastaba ha ahaatee ay gacan ka geysteen khasaaraha nafeedka. Su'aalo la mid ah ayaa quseeya nidaamka kala soocidda adeegga ambalaasyada.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
29	Ma jirtay xakameyn iyo jihayn ku filan intii lagu jiray marxaladda kala soocida/gargaarka caafimaadka?	Walaac ayaa ka dhashay in aan la haynin diiwaanno ku saabsan cidda kala saartay shaqsiyaadka iyo in dhaawacyo kala duwan ee kadhalatay rasaasta ay daabuleen dad shacab ahama laftooda helay/qaaday jidka isbitaalka.	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.
30	Miyeey ahayd in booliisku koox geeyaan Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood markii losoo sheegay toogashada kadhacayso Masjid an-Nuur?	Qoysaska qaar ayaa ka walaacsan in booliisku aysan koox geynin Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood markii la ogeysiiyay toogashada Masjidka An-Nuur. Qaar kale ayaa is-weydiiyay sababta loo sugi waayay amniga goobaha kale ee Islaamka ee magaalada?	Arrintani ayaa ku dhex jirto baaxadda Baaritaanka.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

31	Ma laga yaabaa in CCTV taraafikadu ay gacan ka geysato soo qabashada argaggixiyaha ka hor inta uusan gaarin Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood?	Arrimaha la soo jeediyay ee ku saabsan baaxadda muuqaallada CCTV-ga ee duubay dhacdooyinkii maalintaas, oo ay ku jiraan baabuurkii uu argagixiyuhu ka soo kaxaysay Masjid an-Nuur kuna imaaday Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood, iyo haddii mid ka mid ah CCTV-gan uu ahaa CCTV lala socday. Hadday sidaas tahay, maxaa la sameeyay iyadoo laga jawaabay xawaaraha argaggixiyaha iyo wadista qalafsaneed?	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.
32	Gurmad-bixiyayaasha ugu horeeyay ee ka yimid booliska miyay iska horyimaadeen mise waxay ahaayeen kuwo ku-qalafsan wajahida badbaadayaasha qaarkood?	Walaacayo ayaa lasoo jeediyay oo ah in qaar ka mid ah dadka badbaaday ay sheegeen in ay booliiska 15-kii Maarso 2019 ay ku kaceen fal argagixisanimoo oo ay kula kaceen dadkii la toogtay, iyaga oo leh "waxaa laga fahmay kuwa badbaaday in argagixiyahu uusan kaliya ahayn qofka qori ku fiiqay dadkii la toogtay maalinkaas. Tani waxay kor u qaadaysaa su'aasha ah dhaawac dheeraad ah iyo naxdin ka dhalatay hab-dhaqanka noocan oo kale ah oo gacan ka geysta midkasto oo ka mid ah dhimashooyinka."	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).
33	Haddii booliisku "u oggolaadeen" argaggixiyuhu inuu baxsado.	Badbaade waxa uu sheegay in uu arkay booliis isla wakhtigaas uu joogay argagixiyuhu oo ay u oggolaadeen inuu baxo.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
34	Ma laga yaabaa in booliisku ay joojin lahaayeen jidka argaggixiyaha uu u maraayay ilaa Xarunta Islaamka ee Lindwood?	Soo gudbinada ayaa muujinaya in booliisku aysan joojin argagixiyaha inkastoo uu dadka toogtay markii uu baxayay, ku-wadista xawaare dheereeya oo ku waday waddo khaldan.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

35	Ciriiriga sarreeya ee khadka degdegga ah ee laynka 111 ma ka qayb qaatay in laqaban waayo wicitaankii hore ee Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood?	Soo gudbinada ayaa soo jeedinayaan in wicitaanka 111 ee markii hore laga soo wacay Xarunta Islaamka ee Lindwood markii ugu horeysay ee xabadu dhacday balse ay ahayd mid sugitaan'on hold' 6 daqiiqo. Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ah: miyaa dhammaan taleefoonnada loo soo wacay Booliska, awood nooc ee ah ayay boolisku u leeyihiin inay ka jawaabaan, miyaa jiro nidaam taageero oo la heli karo si kor loogu qaado isgaarsiinta iyo isku xirka wicitaan 111 waqtiga dhacdada toogashada dad badan, iyo miyuu ciriiri ka dhashay wicitaanada laynka 111 gacan ka geystay dhimashada Masjidka?	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
36	Goorma iyo sidee ayaa Isbitaalka Christchurch lagu ogeysiiyay weerarka?	Soo gudbinada waxay waydiinayaan hadii ay tahay sax in isbitaalka Christchurch uu garashadii ugu horaysay ee toogashada ahayd laba nin oo lug uugu yimid kana imaaday Masjid an-Nuur? Hadday sidaas tahay, maxaa si dhakhso ah loogu soo wargelin waayay isbitaalka? Tixraac muuqaalka labada nin ee imanaya.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
37	Miyeeey jiraan wax arrimo ah oo ku saabsan doorka iyo habraacyada Isbitaalka Christchurch ka dib weerarka/inta lagu jiray jawaabta degdega ah	<p>Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Maxaa macluumaad ah oo ay wadaageen CDHB, Booliiska iyo adeegga ambalaasta ka dib markii la ogeysiiyay toogashada? • Miyeeey jireen wax xidhiidh ah oo lala yeeshay isbitaalka Christchurch marka la eego shuruudaha/tijaabada go'aaminta dhimashada ama isku dayga lagu badbaadinayo nafafyo? • Ma laga yaabaa hadii laga fulin lahaa wax adeeg isbitaal ah Masjidka si loo badbaadiyo noloshu? • Maxaa dhacay maalintaas? Dadku miyeeey garanayeen waxay samaynayeen? Ma laga yaabaa in nafa la badbaadin lahaa? • Miyeeey jireen wax cillado ah oo ku saabsan daawaynta kuwa badbaaday kuwaas oo keenaya su'aalo ku saabsan sida mid ka mid ah Shahiidada loola dhaqmay? 	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

38	Miyeeey CDHB si habboon u hawlgelisay oona ma isticmaashay siyaasadaha degdega ah?	<p>Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ahaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waa maxay qorshaha dhacdada ugu weyn? Sidee bay ula xidhiidhaa Canterbury DHB Qorshaha Caafimaadka Degdegga ah ee 2017-ka? Tani miyeeey tahay hab-dhaqanka ugu wanagsan iyadoo loo eegayo aragti madax banaan? Ma la raacay yaase raacay? Maxaa tababar shaqaale oo horay loogu qabtay qorshayaashan? Immisa jeer? Heerar nooc ee ayeey ahaayeen shaqaalaha? • Miyeeey CDHB samaysay ama isticmaashay mid ama dhammaan kuwan soo socda 15-ka Maarso 2019? <ul style="list-style-type: none"> ○ EOC: Xarunta Hawlaha Degdegga ah. Xarun la aasaasay oo lagu xakameynayo lagana bixiyo jawaabta hawlgalka ee dhacdada. ○ Xarunta Isku-duwida Degdegga ah: Xarun la aasaasay; goobta jawaabta xaalad kasta oo degdeg ah la iskugu duwo, oo ka hawlgasha EOC. ○ Nidaamka Maareynta Dhacdooyinka Isku-dubbaridan. Qaab dhismeed si nidaamsan loo maareeyo shilalka degdega ah kaas oo u ogolaanaya wakaalado badan ama unugyo ku lug leh xaalad degdeg ah inay wada shaqeeyaan. • Haddii mid ka mid ah kuwan kor ku xusan la sameeyay ama la isticmaalay, sidee ayay tani u shaqeysay? • Ma la dhisay Xarumihaas kala duwanaa iyo nidaamyadaas iyo qorshayaashii kala duwanaa ee lagu hirgeliyay isku daygii loo baahnaa ee ahaa in nidaam iyo kala dambayn la keeno? 	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
----	--	---	--

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

39	Iskuduwida adeegyada degdega ah.	<p>Soo gudbinada waxay waydiinayaan in uu jiro diyaargarow loogu jiro ka jawaabista weerar argagixisanimo iyo iskuduwida adeegyada gurmada. Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ahaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Miyuu jiray wax diyaar garow ah oo ku aadan isku diyaarinta weerar argagixiso miyeeyšana jirin wax siyaasado ah, nidaamyo ah iyo dhaqamo ah oo la soo saaray ? <ul style="list-style-type: none"> ○ Siyaasadahan miyay ku jireen qorshaynta wadijir ah iyo layliyada? • Maxay ahayd u hoggaansanaanta siyaasadaha, nidaamyada iyo dhaqamadan? • maxay ahaayeen habmaamusyada masaajidka maxaliga ah ama ururka Islaamiga ee qaranka? <ul style="list-style-type: none"> ○ Nidaamyo noocee ah ayay hay'adaha ammaanku kula taliyeen masaajidda ka dib markii ay si isdaba joog ah u kordhay khatarta iyaga soo food saartay sannadihii xigay? • Miyay tababar la'aan, diyaargarow, ama siyaasad, ama u hoggaansanaan la'aanta siyaasadaha iyo nidaamyada, saameyn ku yeelatay kartida gurmada-bixiyayaasha ay u badbaadiyaan noloshu ama si kasta oo kale ay gacan uga geysatey baaxadda khasaaraha noloshu ee dhacday? • Miyay CDHB leheed qodobbada loogu tala galay: <ul style="list-style-type: none"> ○ Iskuduwida isbitaalada, ku filnaantooda iyo u hogaansanaantooda qorshaynta, diyaarinta, siyaasadaha, nidaamyada iyo dhaqamada. ○ Xiriirinta hay'adaha iyo iskudubaridka ka dhexeeya adeegyada gurmada ee khuseeya, iyo adeegyada rayidka ah. ○ Ka faa'iidaysiga ku filan iyo iskudubaridida kheyraadka ○ saameynta dhammaan kuwan kor ku xusan ay ku leeyihiin diyaarinta iyo fulinta gurmada degdega ah. 	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
----	----------------------------------	---	--

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

40	Cilladaha lasoo jeediyay ee u dhexeeya wakhtiga dhimashada iyo isgaarsiinta mobilada?	Dhinacyada qaar kuma qanacsanayn faallada ku jirta dulmarka caddaynta guud ee farqada 8.4, ee odhanaysa: "Baaritaannada booliisku waxay muujiyeen in tan lagu macneeyey cillad aan caadi ahayn oo ku jirta taleefanka gacanta iyo/ama isku xirnaanta maalinta." Qaar kale oo dhibanayaal ah ayaa awooday in ay la xiriiraan qoysaskooda ka hor inta aysan dhiman.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.
41	Iswaafaqid la'aanta wakhtiga toogashada.	Tiro ka mid ah soo-jeedinada waxay xusayaan in Dulmarka Guud ee caddaynta uu diiwaan gelinayo xabadihii ugu horreeyay ee la riday 1:40pm halka warbixinta dib-u-heshiisiintu ay diiwaan gelisay xabadaha ugu horreeya 1:45pm. Soo gudbinada kale waxay sidoo kale kor u qaadayaan welwelka ku saabsan iswaafaq la'aanta kale ee la xiriirta shakhsiyaadka.	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.
42	Dhammaan qoysaska lama siin macluumaadka sida warbixinta dhimashada ka dib ee DVI: ma aysan ogeyn in tani ay jirto iyo inay codsan karaan tan.	-	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.
43	Qoysasku waxay sameeyeen codsiyo macluumaad ah kuwaas oo la diiday ama aan laga jawaabin.	-	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad ah.
44	Ma laga yaabaa in la horumariyo hababka faafinta macluumaadka?	Tiro qoysas ah ayaa xusay dhibaatooyinkii ay kala kulmeen helida macluumaadka ku saabsan dadka ay jecel yihiin ee la la'yahay Iskuulka Hagley iyo Isbitaalka Christchurch.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

45	Waa maxay sababta qoysaska loogu diiday inay si aan lala soconayn ugu galaan meydadka kuwa ay jecel yihiin?	Soo gudbinadu waxay muujinayaan in tani murugo ku ahayd qoysaska.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).
46	Miyay ahayd in qoysaska lagala tashado baadhitaanada dhimashada ka hor inteysan fulinin? Oo ay hanaan ku filan udiyaarsanaayen lana jireen Booliska NZ, SJA iyo Isbitaalka Christchurch si loo fududeeyo daawaynta ku habboon dhaqan ahaan meydka Shahiidka?	Dhinacyadu way fahmeen sharciga arinkan laakiin waxay qabaan in la badalo iyo/ama in marka la eego macnaha caqiidada muslimka la tashigu dhaco. Waxay sidoo kale tixgeliyaan in loo baahan yahay karti dhaqameed badan, tusaale ahaan hubinta in haweenku aysan taaban meydka ragga dhintay. Welwelka guud ee lagu soo jeediyay soo-gudbinada ayaa ahaa in meydka haweenka la dhaqo oo ay gacanta ku hayaan dumarka oo keliya iyo in meydka ragga ah ay dhaqdaan oo ay gacanta ku hayaan ragga oo keliya. Indhaha dhibbanaha iyo daanka hoose waxey ahayd in la xidho oo jidhkana lagu daboolaa maro cad.	Ka baxsan baaxadda Baaritaanka (ma jirto awooda wax looga weydiyo arrintan)
47	Jawaabta dhaqanka iyo baaritaanka dhimashada	Walaaca ay soo jeediyeen qoysaska ee ku saabsan baahida loo qabo in Dhimasho-baadhuu uu ka warqabo oo uu daboolo baahiyaha dhaqanka iyo mida ruuxeedka. Tan waxaa ku jira higaada saxda ah ee magacyada marxuumka iyo masjiain-ka.	Ka baxsan baaxadda Weydiinta (ma jirto awood wax looga weydiyo arrintan)
48	Ilaalinta Masaajidda iyo Xarumaha Islaamka.	Soo gudbinada la helay ayaa kor u qaadaysa haddii, marka loo eego kor u kaca burburinta nacaybka ay dhiiri galisay ee ka dhanka ah guryaha diinta ee NZ, dawladdu waxeey ahayd in ay diyaariso ammaan wanaagsan. Soo gudbinada kale ayaa xusay in RCOI aysan wax faahfaahin ka bixin macluumaadka inta warbixin ee dhaqdhaqaaqyada shakiga leh ee jiray sanado ka hor weerarrada si loo siiyo dareen degdeg ah oo ku hareeraysan ammaanka Masaajidda. Codsiga dhimasho-baadhaha inuu baaro sababta masaajidda loo siin waayey ilaalin dheeraad ah.	Ka baxsan baaxadda Weydiinta (waxaa tixgaliyay RCOI).

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

49	La'aanta awoodda raadraacaida argaggixiyaha keli jilaha ah.	Soo gudbinada la helay ayaa codsinaya in Dhimo-baadhuu uu baaro in hadii ay NZSIS leedahay wax xeelado ah ama karti ay ku ogaan karto jilayaasha keligood ah.	Ka baxsan baaxadda Weydiinta (waxaa tixgaliyay RCOI).
50	Eexda hay'adaha ee ka dhanka ah Muslimiinta.	Arrinta ayaa la soo jeediyay in guul darradan dabagalka xag-jirnimada garabka midig ay ka dhalatay eexda hay'adaha oo ka dhan ah Muslimiinta taas oo ka dhalatay Islaam nacayb. Codsiga inuu Dhimasho-baadhuu baaro in ay jirto eex hay'adeed oo ka dhan ah Muslimiinta sida arrin sifo ah.	Ka baxsan baaxadda Weydiinta (waxaa tixgaliyay RCOI).
51	Waajibaadka qoyska argagixiyaha.	Qoysaska qaar ayaa ka hadlay mas'uuliyadda akhlaaqda ee qoyska argaggixiyaha si ay u ogeysiiyaan hay'adaha dowladda inay ogaadaan walaaca ay ka qabaan aragtidiisa siyaasadeed iyo inay ku guuldareysteen inay si dhaqso ah wax uga qabtaan markii argagixiyuhu fariin u diray 15-kii Maarso 2019.	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).
52	Faallooyinka Shahiidka.	Maxay eheed tallaabada ay qaadeen hay'adaha sirdoonka ee NZ? Ma waxaa aad diirada loo saaray argagixiyada Islaamiga ah sidaas darteed ma jirin wax caqabad ah oo ka hor istaagaya argagixiyahan soo galaya dalka si uu u diyaariyo oo uuna u sameeyo waxa uu sameeyay?	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (waxaa tixgaliyay RCOI).
53	Geedi-socodka cabashooyinka.	Waxaa jiray cabashooyin loo gudbiyay Booliiska oo ku saabsan sida loola dhaqmo Muslimiinta NZ - oo aan si dhab ah loo qaadan. Waxaa jirtay dhacdo ku lug leheed Xarunta Islaamiga ah ee Lindwood, Booliisku wuxuu ballan qaaday in la hubaynayo iyo in toddobaad ka dib uu weli Booliisku hubaysnayn.	Ka baxsan baaxadda Baaritaanka (ma jiraan wax caddaynaya in dhacdada Xaruunta Islaamiga ah ee Lindwood ay dhacday ka hor 15-kii Maarso 2019).

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

54	<p>Maxay ahaayeen sababaha keenay jahwareerka/dib-u-dhaca xiriirka qoysaska ka dib weerarrada iyo sidee loo hagaajin karaa xiriirka ka dib dhacdooyinka khasaaraha badan?</p>	<p>Soo gudbinada ayaa xusay in dib u dhaca ku yimid helista macluumaadka ama bixinta macluumaadka aan saxda ahayn ay keentay murugo weyn taas oo sababtay in qoysasku ay daawataan muuqaalka GoPro ee toogashada ahaa si ay isugu dayaan inay aqoonsadaan kuwa ay jecel yihiin. Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ma jirtay dib u eegis lagu sameeyay waraysiga Booliska iyo habraacyada bayaan-qaadashada? <ul style="list-style-type: none"> ○ Sidee baa hababkan loo dhamaystiri lahaa si faahfaahsan, degdeg badan oo waxtar leh, si looga helo ,macluumaad badan oo tayo sare leh, dadka badan? ○ Ma laga yaabaa in hababka waraysigu ay soo saari karaan macluumaad aad u badan marxalad hore markii arrimuhu cusbaayeen, halkii laga tagi lahaa tafaasiisha muhiimka ah si ay u soo baxaan bilo ama sannado ka dib, sida iyada oo loo marayo wadahalal dib-u-kicin ah oo dhex mara dhibbanayaasha? • Sidee isku xirka, gorfaynta iyo falanqaynta loo samayn karaa si dib loogu dhiso loona sharaxo waxa ku dhacay qoysaska si ka sii balaadhan? 	<p>Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).</p>
----	---	---	--

Lifaaqa koowaad: Arrimaha lagu soo jeediyay soo-gudbinada

55	Haddii ay jiraan dib u eegis gudaha ah oo ku saabsan jawaabta weerarka.	<p>Soo gudbinada ayaa waydiisteen in CDHB, Booliska, iyo Ambalaasta St Johns ay dib u eegeen habraacooda ka dib weerarka, oo ay ku jiraan isku xidhka hay'adaha iyo khadadka isgaarsiinta, iyo waxa isbedelada ee la sameeyay. Su'aalaha gaarka ah waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ma jirtay fursad lagu heli lahaa wacyiga wadajirka ah ee joogitaanka dhammaan noocyada adeegyada degdegga ah maalintaas kuwaas oo isku dubaridi karay jawaabta? • Sidee baa adeegyada kala duwan ee mid kasta oo ka mid ah meelahan degdegga ahi u ogaan karaan goobta iyo awoodda mid kasto ugu jawaabo marka loo baahdo? • Ma laga yaabaa in xarunta taliska hawlgallada maxalliga ah sida Xarunta Caddaaladda haddii si habboon loogu wargaliyo hay'adaha ay khusayso, ma ka ciyaari kartaa dowr ilaalinta jadwalka dhammaan dhacdooyinka degdegga ah iyo adeegyada dhulka, oo ayna gacan ka geysato isku-dubbaridka adeegyadan haddii loo baahdo? <ul style="list-style-type: none"> ○ Ma laga yaabaa in xarunta taliska isgaadhsiinta ee noocaas ahi ay door muhiim ah ka ciyaari lahayd isku-duwidda guud? • Ma laga yaabaa in nooc ka mid ah aqoonsiga adeegyada degdegga ah uu yarayn karay arrinta Booliiska u baahnaayeen oo ahayd in ay aqoonsadaan kuwa la dhaariyay? <ul style="list-style-type: none"> ○ Ma laga yaabaa in isku-dubbarid noocan oo kale ah iyo kobcinta aqoonsiga ay gacan ka geysan leheed xaaladda cakiran ee aan ahayn kaliya in Boolisku aqoonsado saraakiisha kale laakiin sidoo kale in dhibbanayaasha ay awood u leeyihiin inay aqoonsadaan Booliiska iyo gurmada degdegga ah? 	Arrinkan ayaa lasoo jeediyay in lagu xalliyo codsitaan macluumaad.
56	Cilladaha dukumeenteynta/diwaan-gelinta	<p>Hal ka mid ah soo gudbinada ayaa soo jeediyay haddii uu jiro liis qeexan oo dhinacyada xiiseynaya, waxaana lagu booriyay liis cusub oo ka mid ah kuwii hore loo isticmaalay la hagaajiyo. Soo gudbintu waxay dhalisay walaac ku saabsan cidda loola dhaqmayo sidii dhibane.</p> <p>Waxaa sidoo kale walaac laga muujiyey hannaanka Shahaadada Geerida iyo sida loo xalliyay tafaasiisha shahaadooyinkaas. Walaac la mid ah ayaa laga keenay dukumeentiyada DVI ee la isticmaalay. Guud ahaan, soo gudbintu waxa ay tixgelisay in macluumaadka ay dhibbanayaashu heleen, sida dulmarka caddaymaha, ay u baahan yihiin in lagu sii habeeyo baahidooda.</p>	Ka baxsan baaxadda baaritaanka (ma jirto wax sharci maxkamad ah oo arrintan wax laga weydiin karo).